# FALANQAYN HESHIISKA GOLAHA WADATASHIGA QARAN EE DOORASHOOYINKA

Somali Public Agenda Faallo Qoto-dheer No. 05

**Juun 2023**



# FALANQAYN HESHIISKA GOLAHA WADATASHIGA QARAN EE DOORASHOOYINKA

Somali Public Agenda Faallo Qoto-dheer No. 05

**Juun 2023**

**Somali Public Agenda**
Moqdisho
Soomaaliya
Tel: +252(0)85 8358
Email: info@somalipublicagenda.org
Website: <https://www.somalipublicagenda.org>

© Somali Public Agenda 2023

Somali Public Agenda (SPA) waa hay'ad aan macaash doon ahayn oo ka shaqeysa cilmibaarista arrimaha jaangoynta iyo maareynta siyaasadaha dalka xarunteeduna tahay magaalada Muqdisho. Ujeedka hay'adda waa hagaajinta maamulka dowliga ah iyo horumarinta adeegyada dowladda ee Soomaaliya iyadoo loo marayo cimibaaris iyo falanqeyn aqoon ku dhisan.

Marka laga reebo sawirada dhinac saddexaad uu qaaday, nuqulkan elektorooniga ah ee daabacaadan waxaa lagu heli karaa shatiga Creative Commons Attribution-NonCommercial-ShareAlike 3.0 (CC BY-NC-SA 3.0). Waxaad xor u tahay inaad nuqul ka daabacato, qeybiso oo gudbiso daabacaadda waase haddii aanay ganacsi ahayn, oo aad si habboon u sheegto daabacaadda, sidoo kalena aad ku faafiso shati lamid ah. Macluumaad intaas ka badan haddii aad rabtid, booqo shabakada Creative Commons: <http://creativecommons.org/licenses/by-nc-sa/3.0/>.

Somali Public Agenda
Mogadishu
Somalia
Tel: +252(0)85 8358
Email: info@somalipublicagenda.org
Website: <https://www.somalipublicagenda.org>

Naqshadeynta faallada: Somali Public Agenda
Tifaftiraha: Peter Chonka

## Tusmo

**Nuxurka Faallada** . . . . . . . . . . 1

**Hordhac** . . . . . . . . . . 3

**ARRINTA KOOWAAD: Nooca Doorashada iyo Qeexidda Deegaan Doorashada** . . . . . 4

**ARRINTA LABAAD: Xisbiyada Siyaasadda** . . . . . . . . . . 6

**ARRINTA SADDEXAAD: Doorashooyinka Dowlad-goboleedyada, Isku-xejinta, iyo Wakhtiyada** . . . . . . . . . . 8

**ARRINTA AFARAAD: Nidaamka Madaxtooyada** . . . . . . . . . . 11

**ARRINTA SHANAAD: Guddiga Maareynta Doorashada** . . . . . . . . . . 12

**Caqabado Kale** . . . . . . . . . . 14

**Talooyin Tixgelin Mudan** . . . . . . . . . . 16

**Ku saabsan Somali Public Agenda** . . . . . . . . . . 19

## NUXURKA FAALLADA

- Xubnaha Golaha Wadatashiga Qaran (GWQ) – marka laga reebo Madaxweynaha Puntland – ayaa saxiixay heshiis muran badan dhaliyay oo ku saabsan doorashooyinka heer qaran, heer dowlad-goboleed iyo heer gole deegaan ee Soomaaliya. Heshiisku waxa uu soo jeedinayaa hannaanka doorasho ee metelaadda isku-dheellitiran iyo liiska xeran, iyo hal deegaan doorasho. Inkastoo nooca doorasho ee lasoo jeediyay loo arko in uu yahay nooc ku habboon jawiga siyaasadeed iyo amni ee Soomaaliya, haddana hannaanka hal deegaan doorasho ayaa horay u dhaliyey khilaaf. Heshiisku waxa uu u baahan doonaa in dib-u-eegis lagu sameeyo Sharciga Doorashooyinka Qaranka kaasoo qeexaya in nooca doorasho uu yahay Horreeyaa Guuleysta kuna salaysan yahay nidaamka 4.5.
- Heshiisku waxa uu kusoo koobay tirada xisbiyada siyaasadda labo xisbi. Labada xisbi siyaasadeed ayaa kasoo bixi doona doorashada goleyaasha deegaanka ee la qorsheeyay in ay qabsoomaan Juun 2024, waxa ayna labada xisbi ku tartami doonaan doorashooyinka heer dowlad-goboleed kadibna doorashooyinka guud ee qaranka. Labada xisbi ayaa xaddidaya ikhtiyaarka muwaadiniinta iyo siyaasiyiinta, waxa uuna hor istaagayaa soo bixitaanka xisbiyo siyaasadeed oo heer dowlad-goboleed ah, raad-horena kuma laha taariikhda Soomaaliya. Hirgelinta qodobkan waxa uu u baahan doonaa in dib-u-eegis iyo wax-ka-beddel lagu sameeyo sharciga xisbiyada siyaasadda (Xeer Lr. 19 ee 27 Juun 2016).
- Inkastoo iswaafajinta doorashadu ay noqon karto hab wanaagsan oo lagu yarayn karo kharashaadka iyo wakhtiga ku baxa doorashooyinka, soo jeedintani waxa ay leedahay caqabado. Waxaa kamid ah wakhtiga doorashada oo aan maan-gal ahayn, iska indha-tirka wakhtiyada iyo muddo-xileedyada kala duwan ee ku qeexan dastuurada dowladda federaalka iyo dowlad-goboleedyada, sharciyeynta muddo kororsiga inta badan dowlad-goboleedyada, iyo ku guul darreysiga in la tixgeliyo khilaafyada siyaasadeed ee ka jira heer dowlad-goboleed.
- Heshiiska GWQ waxa uu soo jeediyay in laga guuro nidaamka isku-dhafka ah ee hadda jira loona guuro nidaam madaxtooyo. Nidaamka lasoo jeediyay ayaa meesha ka saaraya doorka Ra'iisul Wasaaraha. Waxa ay u baahan doontaa is-afgarad ballaaran oo dhex mara saamileyda siyaasadda, ansixinta saddex meelood labo meel ee baarlamaanka iyo sidoo kale afti-u-qaadista dastuurka.
- GWQ ayaa isku raacay dhismaha Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka iyo Soohdimaha oo ka koobnaan doona 15 xubnood, halka tirada Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka Qaranka ee hadda oo ahaa 9 xubnood laga dhigay 15 xubnood. Heshiisku waxa uu dowlad-goboleedyada farayaa in ay min 2 xubnood usoo

magacaabaan guddiga. Sharciga maamulaya dhismaha Guddiga Doorashooyinka iyo Soohdimuhu ma cadda; waxa ayna abuuri kartaa dhisidda guddi doorasho oo la siyaasadeeyay oo aan shaqeyn; mana cadda muddo xileedka 15-ka xubnood ee guddigu.

- Faalladan qotoda-dheer waxa ay falanqeynaysaa caqabado dheeraad ah oo ay kamid yihiin waafaqsanaan la'aanta dastuurka iyo xiriir cad oo arrimahan kala dheexeeya dib-u-eegista dastuurka; ka maqnaanshaha Puntland ee heshiiska; la tashi la'aan; iyo isku dhex-daridda arrimo dhowr ah. Waxa ay faallada kusoo gabagabeyneysaa talooyin dhowr ah oo tixgelin mudan.

## HORDHAC

27-kii Maajo 2023, kadib shir Muqdisho ka socday saddex maalmood, xubnaha Golaha Wadatashiga Qaran – marka laga reebo Puntland – waxa ay soo saareen war-murtiyeed iyo heshiis cusub oo diiradda lagu saaray dimuqraadiyeynta. Si lamid ah shirkii hore ee GWQ ee bishii Maarso, Madaxwaynaha Puntland Deni ayaanan ka qeyb gelin shirka GWQ. War-murtiyeedka GWQ ayaa lagu bogaadiyay guulihii ay ciidamadu dhawaan ka gaareen la-dagaallanka al-Shabaab iyo u diyaargarawga wajiga labaad ee howlgallada. Waxa uu sidoo kale carrabka ku adkeeyay baahida loo qabo in la dardargeliyo dib-u-habeynta maamulka maaliyadda taas oo qeyb ka ah geeddi-socodka deyn cafinta, waxa uuna ku faafaahiyey heshiiska doorashooyinka dukumenti gaar ah.

Heshiiskan faahfaahsan ee ku saabsan doorashooyinka qaranka iyo kuwa dowlad-goboleedyada ayaa ah qorshihii dimuqraadiyeyn ee ugu hiigsiga fogaa taariikhda Soomaaliya, waxa uuna soo jeediyay isbeddello hor leh oo ku yimaada marxaladda Soomaaliya. Waxa uu ka abuuray falcelinno kala duwan guud ahaan Soomaalida, oo ay kamid ahayd dhaleecayn dhinacyo gaar ah ka timid. Iyadoo laga ambaqaadayo heshiiskan muranka badan dhaliyay, faalladan qotoda-dheer waxa ay falanqeyneysaa qeybaha muhiimka ah ee heshiiska doorashada muranka badan dhaliyay oo ay GWQ gaareen, iyadoo ay faalladu iftiiminayso fursadaha iyo caqabadaha dhaqangelinta heshiiska.

## ARRINTA KOOWAAD: NOOCA DOORASHADA IYO QEEXIDDA DEEGAAN DOORASHADA

GWQ waxa ay isku-raaceen in la qabto doorasho qof iyo cod ah, una dhexeysa labo xisbi siyaasadeed, oo ku saleysan nidaamka Metelaadda Isku-dheellitiran iyo Liiska Xeran iyo Hal Deegaan Doorasho. Nidaamkan, xisbiyada siyaasaddu waxa ay u gudbinayaan guddiga doorashada liis xiran oo musharraxiin ah kuwaasoo u taagan 275-ta xubnood ee Golaha Shacabka Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, ugu badnaan 550 musharrax ayay gudbin karaan, iyadoo uu xisbi kasta usoo sharraxayo kursi kasta ugu yaraan hal musharrax iyo ugu badnaan labo musharrax.

Nooca doorasho ee Metelaadda Isku-dheellitiran iyo Liiska Xeran oo ay GWQ ay ku heshiiyeen ayaa loo arkaa nooca doorasho ee suurtagelin kara in doorasho laga hirgeliyo Soomaaliya. Isla noocan ayaa bishii Juun 2018 ay Golaha Amniga Qaranku ku heshiiyeen magaalada Baydhabo markii dambana waxaa lagu daray Hindise-sharciyeedka Doorashooyinka Qaranka ee ay ansixiyeen golaha wasiiradu bishii Maajo 2019. Sikastaba ha ahaatee, noocan doorasho waxaa gabi ahaanba meesha ka saaray guddi kumeelgaar ah oo baarlamaanku u saaray dib-u-eegista hindise-sharciyeedka doorashada. Sharciga Doorashooyinka Qaranka ee hadda jira, oo uu saxiixay Madaxweynihii xilligaas, Maxamed Cabdullaahi Farmaajo, horraantii 2020, ayaa qeexaya nooca doorashada in uu yahay Horreeyaa Guuleysta, waxa uuna sharciyeynayaa isticmaalka nidaamka awood-qeybsiga beelaha ee 4.5.

Noocan doorasho waxa uu leeyahay faa'iidooyin dhowr ah oo awood u siin kara hirgelinta doorasho guud. Waxa uu meesha ka saarayaa arrimo badan oo caqabad ku noqon kara hirgelinta doorashada, sida in qaar kamid ah deegaanada Soomaaliya ay wali gacanta ku hayaan al-Shabaab, in uusan is-fahan siyaasadeed ka jirin xiriirka Soomaaliland iyo dowladda federaalka, iyo maqaamka Gobolka Banaadir oo aan weli la caddeynin. Waxaa intaa dheer, nooca Metelaadda Isku-dheellitiran iyo Liiska Xeran ayaa si guul ah loogu isticmaalay doorashooyinkii goleyaasha deegaanka Puntland. Sidaas darteed waxa ay noqon kartaa tallaabo macquul ah oo loo qaaday dhanka dhismaha xisbiyo siyaasadeed oo si firfircoon uga qeyb qaata siyaasadda Soomaaliya ee heer qaran iyo dowlad ay shacabku u arkaan in ay matasho.

Heshiiska nooca doorashada federaalku, haddii si daacad ah looga shaqeeyo, waxa uu noqon karaa mid sal adag u noqda hirgelinta doorashooyin Soomaaliya. Sikastaba ha ahaatee, xaaladda hadda jirta marka la eego, waxa uu wajahayaa caqabado dhowr ah oo ku aaddan hirgelintiisa. Ugu horreyn, halka deegaan doorasho ayaa horay u dhaliyey khilaaf. Kadib markii la isku raacay 2018, waxaa markii dambe diiday madaxwaynayaasha dowlad-goboleedyada oo dabayaaqadii sanadkaas ku kulmay magaalada Kismaayo. Wakhtigan waxaa sidoo kale jira khatar

ah in madaxwaynayaasha dowlad-goboleedyada aysan si buuxda daacad uga ahayn arrinta heshiiska oo ay dalban karaan in dib-u-eegis lagu sameeyo arrinta deegaan doorashada. Tani waxa ay si gaar ah u badan tahay haddii Puntland ay dib ugusoo laabato GWQ sababtoo ah taariikh ahaan waxa uu maamulka Puntland kasoo horjeeday halka deegaan doorasho.

Midda labaad, nooca doorashada Metelaadda Isku-dheellitiran iyo Liiska Xeran waxa uu u baahan doonaa in dib loo eego Sharciga Doorashooyinka Qaranka ee hadda jira, kaasoo lagu saleeyay nooca doorasho ee Horreeyaa Guuleysta iyo nidaamka 4.5. Inkastoo tani ay u badan tahay in ay lagama maarmaan noqon doonto, haddana waxaa laga yaabaa in ay wakhti qaadato in dib-u-eegis lagu sameeyo sharciga doorashada oo la ansixiyo, taasoo saameyn ku yeelan karta jadwalka doorashooyinka.

Midda saddexaad, noocan doorasho ma qeexayo habka loo wajahayo metelaadda beelaha. Tani waxa ay u muuqataa isku-day kutalagal ah oo lagu doonayo in meesha looga saaro awood qeybsiga beelaha ee Soomaaliya. Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha ayaa sheegay in heshiiskan uu meesha ka saarayo hannaankii wax ku qeybsiga beelaha ee 4.5: "Ka guuridda nidaamka 4.5 ayaa si gaar ah muhiim u ah maadaama uu albaabada u furayo in la helo hoggaan leh kala duwanaansho iyo metelaad ka badan tan hadda jirta. Nidaamkan cusub waxa uu xaqiijinayaa in shacabku la xisaabtamaan siyaasiyiinta ee aysan la xisaabtamin dallaaliinta siyaasadda, taasoo meesha ka saaraysa heshiisyada daaha-dabadiisa lagu galo ee inta badan ku saleysan lacag iyo daacadnimada qabiilka". Inkastoo rabitaanka ka guuridda awood qeybsiga beelaha ay tahay mid bogaadin mudan, lagana yaabo in ay furto fursado badan oo ka qeyb-gelin, in laga guuro nidaamka 4.5 iyadoo aan wax laga qaban khataraha ka-qaybgelin la'aan ee kooxaha qaar soo wajihi karta waxa ay keeni kartaa khilaafyo hor leh. Haddii ay dhab ahaan ujeedadu tahay in ka-qeyb gelinta la ballaariyo, tallaabadan qaadisteedu waxa ay waxtar badan yeelan lahayd markii la sameeyo la tashi dheeraad ah oo lala yeelanayo shacabka iyo guud ahaan siyaasiyiinta. Dhowr nooc ayaa jira oo sii joogteyn kara qeybo kamid ah 4.5 suurtagalinna kara codbixin guud, sida zebra listing.

## ARRINTA LABAAD: XISBIYADA SIYAASADDA

Heshiiska GWQ waxaa kale uu soo jeediyay in dalku uu ka guuro nidaamka xisbiyada badan loona guuro nidaamka labada xisbi, taasoo kusoo koobeysa tirada xisbiyada qaran labo keliya. Labadan xisbi waxaa noqon doonaa labada xisbi ee ugu codadka bata doorashada goleyaasha deegaanka ee ka dhici doonta Soomaaliya oo dhan bartamaha sanadka 2024. Xisbiyadani waxa ay markaas kadib u tartami doonaan labada doorasho ee baarlamaanka iyo madaxtooyada heer dowlad-gobaleed iyo sidoo kale doorashooyinka baarlamaanka iyo madaxtooyada ee heer qaran.

Soo jeedintan ayaa layaab ku noqotay siyaasiyiinta iyo shacabka Soomaaliyeed, waxaana jira cillado dhowr ah ee uu leeyahay nidaamkan. Ugu horreyn, heshiisku ma laha taariikh hore kamana mid ahayn doodaha doorashooyinka Soomaaliya. Hadda, xisbiyada siyaasadda iyo ka-qeybgalkooda siyaasadda waxaa lagu qeexay sharciga xisbiyada siyaasadda (Xeer Lr. 19 ee 27 Juun 2016). Guddiga Madaxa-banaan ee Doorashooyinka Qaranka ayaa si kumeelgaar ah u diiwaangeliyay 110 xisbi lixdii sano ee lasoo dhaafay. Muddadii ka horreysay xukunkii militariga (1960-69), dimuqraadiyadda Soomaaliya waxa ay ku dhisnayd nidaamka xisbiyada badan – 64 xisbi siyaasadeed ayaa ka qaybgalay doorashadii baarlamaanka ee ugu dambaysay 1969-kii. Nidaamka labada xisbi ayaa sidaas darteed ku cusub siyaasadda Soomaaliya.

Midda labaad, waxa laga yaabaa in ay caqabad noqoto in xisbiyo qaran oo baaxaddaas leh in ay ka hawlgalaan dowlad-goboleed kasta. Mid kamid ah sababaha ugu wayn ee 110-ka xisbi siyaasadeed ee sida kumeelgaarka ah isu diwaangeliyay ay ugu gudbi waayeen in ay noqdaan xisbiyo rasmi ah ayaa waxa ay tahay in shardi looga dhigay in ay xafiisyo ka furtaan ugu yaraan 9 gobol oo kamid ah gobolladii jiray kahor 1991 ayna ka diiwaan-gashan yihiin xisbiga ugu yaraan 10,000 oo xubnood. Waa ay awoodi waayeen in ay xafiisyo ka furtaan dowlad-goboleedyada sababta oo ah aragtida laga aaminsan yahay in hal qabiil ku badan yahay hoggaanka xisbiga. Tusaale ahaan, waa ay ku adkaatay in xisbiyada siyaasadeed ee ay hogaamiyaan siyaasiinta Hawiye ay ka howl-galaan Puntland oo ah dowlad-goboleedka kaliya ee leh amni ilaa xad ah oo ay ururrada siyaasaddu ka howl-gali karaan. Iyadoo la tixgelinayo xaaladahan, waxaa laga yaabaa in ay caqabad noqoto in labo xisbi oo keliya ay ka howl-galaan dalka oo dhan. Dhanka kale, labada xisbi waxa ay ku qasbanaan doonaan in beelo kala duwan xubno ka noqdaan.

Midda saddexaad, nidaamkan labada xisbi siyaasadeed waxa uu xaddidaya ikhtiyaarka muwaadiniinta iyo siyaasiyiinta labadaba. Muwaadiniintu waxa ay ku qasbanaan doonaan in ay kala doortaan labo xisbi oo kaliya marka ay tagaan sanduuqa codbixinta, taasoo yarayneysa fursadaha ay u heli karaan in ay doortaan xisbi waafaqsan ama u taagan aragtidooda siyaasadeed ee gaarka ah. Labada xisbi

siyaasadeed ayaa noqon doona saamileyda koowaad ee dal doorashooyinkiisa dadban ee heer qaran ay ku lug-lahaayeen daneeyeyaal badan oo ay kamid yihiin odayaasha dhaqanka beelaha, madaxwaynayaasha dowlad-goboleedyada, hoggaanka dowladda federaalka ee xilka haya, siyaasiyiinta mucaaradka ah, iyo beesha caalamka oo inta badan maalgalisa doorashooyinka. Si lamid ah taas, siyaasiyiinta aragtidoodu iyo ajendahoodu waxa uu ku koobnaan doonaa iyaga, waxa ayna ku qasbanaan doonaan in ay kala doortaan ikhtiyaar aad u kooban.

Ugu dambeyntii, waxa ay u badan tahay in nidaamka labada xisbi uu saameyn doono rajada qayb kamid ah siyaasiyiinta iyo xisbiyada siyaasadeed. Siyaasiyiinta leh ajendayaasha maxaliga ah ayaa laga yaabaa in ay ku hungoobaan doorashooyinka degmooyinka, maadaama cod-bixiyeyaashu ay codkooda ku salayn karaan oo siin karaan xisbiga siyaasadeed ee ay jeclaan lahaayeen in uu horumar ka sameeyo doorashooyinka heer qaran. Arrintani haddaba waxa ay yareyn kartaa fursadaha siyaasiyiinta doonaya in ay diiradda saaraan siyaasadda dowlad-goboleedyada, taasoo sii ballaarin karta ka-qeyb-gelin la'aanta dal ay markii horeba siyaasaddiisa gacanta ku hayeen siyaasiyiin fadhigoodu yahay magaalyooyinka waaweyn ama caasimadaha.

## ARRINTA SADDEXAAD: DOORASHOOYINKA DOWLAD-GOBOLEEDYADA, ISKU-XEJINTA, IYO WAKHTIYADA

Heshiiska GWQ waxaa kale oo uu qeexayaa qaabka ay u dhacayaan doorashooyinka dowlad-goboleedyadu, iyo sidoo kale wakhtiga iyo sida ay isugu xigaan doorashooyinka dalka.

- **Doorashooyinka Goleyaasha Deegaanka:** Heshiisku waxa uu qeexayaa in doorasho qof iyo cod ah oo golaha deegaanka ah laga qaban doono bisha Juun 2024 (Waxaa ka dhiman hal sano) dhammaan degmooyinka Soomaaliya.
- **Doorashada Baarlamaannada iyo Madaxweynayaasha Dawlad-goboleedyada:** Heshiisku waxaa kale oo uu dhigayaa in doorashooyinkaas noqon doonaan qof iyo cod una dhexeyn doonaan labada xisbi siyaasadeed ee ugu codka batay doorashooyinka goleyaasha deegaanka, taasoo ka dhigan ka guuris wayn ee qaabka beelaha ku saleysan oo ay dhammaan goleyaasha dowlad-goboleedyadu hadda isticmaalaan. Doorashooyinkaas waxa ay dhici doonaan 30-ka Nofembar, 5 bilood kadib marka lasoo gabagabeeyo doorashooyinka goleyaasha deegaanka.
- **Doorashada Golaha Shacabka:** Doorashooyinka qaran waxa ay ku xigi doonaan doorashooyinka degmooyinka, marka nidaamkan ay kusoo baxaan labo xisbi. Heshiisku ma uusan caddeyn xilliga ay dhacayaan doorashooyinka federaalka ee baarlamaanka iyo madaxwaynuhu. Sikastaba ha ahaatee, heshiisku waxa uu sheegay in doorashooyin heerar kala duwan oo dowladeed ah ay dhacaan shantii sanaba mar kana bilaabanaya maalinta doorashooyinka lasoo gabagabeeyo. Tusaale ahaan, haddii si guul ah loo qabto doorashooyinka degmooyinka bisha Juun 2024, doorashada ku xigta ee golaha deegaanku waxa ay noqon doontaa Juun 2029. Waxa ay sidoo kale laga fahmi karaa in doorashooyinka xiga ee heer federaal ay dhici doonaan 2027.
- **Doorashada Aqalka Sare:** Habka doorasho ee loo adeegsan doono doorashada xubnaha Aqalka Sare kuma qeexna heshiiska GWQ inkastoo deegaan-doorashada lagu heshiiyey in uu yahay Dowlad-goboleedyada. Heshiiska ayaa sidoo kale lagu sheegay in metelaadda Gobolka Banaadir ee Aqalka Sare lagu caddeyn doono sharci qeexi doona maqaamka Muqdisho si waafaqsan qodobka 9-aad ee Dastuurka.

Is-waafajinta wakhtiyada doorashooyinku waxa ay noqon kartaa hab wanaagsan oo lagu dhimi karo kharashaadka ku baxa doorashooyinka iyo qabsashada doorashooyinka ee jawiga siyaasadeed. Sikastaba ha ahaatee, waxaa jira cawaaqib dhawr ah oo ka dhalan kara arrintan iyo aragtiyo ay adagtahay in la hirgeliyo. Marka hore, wakhtiyada doorashooyinku ma aha kuwo maan-gal ah, gaar ahaan doorashooyinka dowlad-goboleedyada. Doorasho ma aha dhacdo hal maalin ah; waa howl u baahan amni, dhaqaale, rabitaan siyaasadeed, xasillooni siyaasadeed,

iyo muruq dadeedba. Ku dhawaad labaatan sano ayay ku qaadatay Puntland in ay qabato doorashooyin gole deegaan.

Qaar badan oo kamid ah dowlad-goboleedyada ay GWQ ka filayaan in ay qabtaan doorashooyinka ayaan si buuxda u maamulin dhulkooda ayna dhif tahay in ay isticmaalaan waddooyinka si ay isaga kala gooshaan degmooyinka sababo la xiriira ammaanka. Qaar badan oo dowlad-goboleedyada kamid ah ayaa ku dhibtooday in ay sameeyaan dhismaha gole deegaan ee degmooyinka waawayn, taasoo ah hannaan ka sahlan doorasho toos ah. Taas marka laga tago, si loo hirgeliyo doorashooyinkan, waxaa kale oo jira in ay tahay in la diyaariyo hay'ado iyo shuruuc kala duwan (oo uu ku jiro wax-ka-beddel lagu sameeyo dastuurka) kuwaasoo u baahan in dib-u-eegis lagu sameeyo si sal-dhig iyo aasaas loogu sameeyo hirgelinta qorshayaasha lasoo ban-dhigay, kuwaasoo qaadan kara bilooyin badan. Tusaale ahaan, weli lama dhisin guddigii doorasho ee maamuli lahaa doorashada, waxa ayna qaadanaysaa wakhti in ay ku horumariyaan awooddooda hay'addeed ee guddiga si uu dalka qaybihiisa kala duwan uga diyaariyaan doorashooyin. Maalgelinta doorashooyinku iyana waxa ay sidoo kale noqon doontaa caqabad weyn, gaar ahaan gobollada awoodahooda dakhli uu aad u hooseeyo. Sidoo kale, wakhtiga dib-u-eegista lagu samayn karo sharciga lagu maamulayo xisbiyada siyaasadda laguna dhisi karo kartida xisbiyo siyaasadeed oo kasban kara taageerada dadwaynaha si wax-ku-ool ahna ugu tartami kara doorashooyinka aad ayuu u kooban yahay. Kalsooni darrada beelaha dhexdooda ayaa sidoo kale aad u sarreysa, qabashada doorasho waxa ay u baahan tahay waxbarasho madani ah oo ballaaran iyo dib-u-heshiisiin si looga fogaado in isku-dhacyo ka yimaadaan doorashada.

Marka lasoo uruuriyo, kaabayaashii doorashada ee Soomaaliya ka suurtagalin lahaa qabashada doorashada goleyaasha deegaanka muddo hal sano gudaheed ah wali ma jiraan. Haddii lagu guul darreysto qabashada doorashada sanad kadib, waana mid u muuqata in aan laga fursan doonin, waxa ay la macno tahay in madaxda dowlad-goboleedyada xilka haya hadda ay sii hayaan ilaa muddo aan la cayimin maadaama aysan ku caddeyn heshiiska GWQ muddada xil-sii-heynta madaxda dowlad-goboleedyada haddii tallaabada ugu horreysa ee doorashada goleyaasha degmooyinka lagu qaban waayo wakhtigeeda.

Midda labaad, heshiiska GWQ waxa uu iska indhatirayaa wakhtiyada iyo muddo-xil-haynta kala duwan ee ku qeexan dastuurka dowladda federaalka iyo kuwa dowlad-goboleedyada, waxa uuna sharciyeynayaa muddo kororsiga inta badan madaxda dowlad-goboleedyada (marka laga reebo Hirshabeelle) waxa uuna tilmaan taas lamid ah ka bixinayaa muddada dowladda federaalka. Marka laga tago in ay tani ka hor-imaanayso hab-raacyada dastuurrada hadda jira, waxa ay sidoo kale ka hor-imaanaysaa mabaadi'da dimoqraadiga ah, waxa ayna u baahan doontaa is-afgarad siyaasadeed iyo mid dadwayne oo baahsan si looga fogaado xasillooni darro. Hadda waxaa jirta halis ah in heshiisyada noocan oo kale ah aan loo galin si daacadnimo ku dheehantahy. Halbeeg kale oo lagu maareynayo caqabadahan

si wax-ku-ool ah ayaa noqon kara hab isdaba joog ah oo u oggolaanaya dowladda federaalka in ay diiradda saarto dadaalladeeda doorashooyinka heer dowlad federaal iyo la fal-galka doorashooyinka dowlad-goboleedyada si waafaqsan hannaanka dastuurada dowlad-goboleeyadu qeexayaan.

Midda saddexaad, wakhtiyadan doorashada ee la dejiyay waxa ay iska indha tirayaan xaaladaha iyo heshiisyada siyaasadeed ee u gaarka ah dowlad-goboleed kasta. Heshiiskani waxa uu ku guul darreystay in uu si dhab ah u tixgeliyo khilaafyada siyaasadeed ee qotoda dheer ee ka jira heer dowlad-goboleed, taasoo wiiqeysa heshiisyo horay loo galay. Tusaale ahaan, heshiiskii Dowlad-Goboleedka Koonfur Galbeed ee sanadkan bishii Febraayo Baydhabo lagu gaaray waxaa lagu heshiiyay in doorashada madaxtinimada Koonfur-Galbeed la qabto Disembar 2023 si loo yareeyo xasillooni darada ka jirta maamulkaasi. Dowlad-goboleed kasta waxa uu si gaar ah ula tacaalayaa arrimaha ka-qayb-galinta iyo metelaadda, sidaas darteed, hirgelinta degdegga ah ee doorashooyin qof iyo cod ah waxa ay keeni kartaa isku dhacyo.

## ARRINTA AFARAAD: NIDAAMKA MADAXTOOYADA

Heshiiska doorashada ee GWQ ayaa sidoo kale soo jeedinaya in laga gudbo nidaamka baarlamaaniga ah ee hadda jira loona guuro nidaamka madaxtooyada, meeshana laga saaro xafiiska Ra'iisul Wasaaraha oo lagu beddelo madaxweyne ku xigeen. Madaxweynaha iyo ku xigeenkiisa ayaa ay muwaadiniinta kusoo dooran doonaan hal warqad-codeyn. Nidaamka dowladnimo ayaa weli ah mid kamid ah arrimaha siyaasadeed ee Soomaaliya la isku hayo. Marka laga hadlayo heer federaal, Soomaaliya waxa ay yeelatay nidaam madaxtooyo kaliya 21-kii sano ee dowladdii militariga. Dowladdii rayidka ahayd ee ka horreysay sanadkii 1969 (Jamhuuriyaddii koowaad) iyo dowladihii xukunka yimid lagasoo bilaabo sanadkii 2000 (Jamhuuriyadii saddexaad) ilaa maanta waxa ay lahaayeen madaxwayne iyo ra'iisul wasaare. Marka la eego heer dowlad-goboleed, Soomaaliya waxa ay ku dhaqantaa hab madaxtooyo-xigeen ah. Puntland, Galmudug, iyo Hirshabeelle ayaa leh Madaxwayne iyo Ku-xigeen ay soo doortaan xildhibaannada dowlad-goboleedyadaasi. Koonfur-Galbeed wali ma yeelan Madaxweyne ku-xigeen, halka Jubbaland ay leedahay labo Madaxweyne ku-xigeen oo lasoo magacaabo. Arrinta ay wadaagaan ayaa ah in baarlamaanadu ay soo doortaan madaxwaynayaasha, taasoo ka dhigaysa nidaamkan mid nidaam madaxtooyo iyo baarlamaan oo isku dhafan.

Waxaa jira caqabado dhowr ah oo la xiriira u guurista nidaamka madaxtooyada. Ugu horreyn, nidaamka madaxtooyada ee lasoo jeediyay waxa uu meesha ka saarayaa doorka ra'iisul wasaaraha. Inkastoo ay tani keeni karto xasilooni siyaasadeed iyo in laga fogaado khilaaf soo dhex-gala Madaxwaynaha iyo Ra'iisul Wasaaraha, waxa ay sidoo kale keeni kartaa xukun kaligii-talis ah iyadoo ay jirto maqnaashaha xisbiyo siyaasadeed oo adag oo mucaarad ah. Ka fogaanshaha nidaam soo saara Madaxwayne awoodo badan leh ayaa kamid ahayd sababihii ugu waawaynaa ee keenay in lasoo kordhiyo doorka Ra'iisul Wasaare leh awoodo fulineed oo waawayn. Isbeddelka lasoo jeediyay ayaa sidoo kale meesha ka saaraya doorkii baarlamaanka ee soo doorashada Madaxweynaha, taasoo suurtagal ah in ay sii kordhiso awoodaha Madaxweynaha, yareyn doontana doorka kor-joogtayn ee baarlamaanka.

Midda labaad, inkastoo dastuurka kumeelgaarka ah ee federaalku uu ku jiro dib-u-eegis, haddana waxa uu leeyahay qodobo qeexaya doorka Ra'iisul Wasaaraha iyo Golaha Wasiirada (Qodobbada 97 ilaa 104). U guurista nidaamka madaxtooyadu waxa ay u baahan tahay is-afgarad ballaaran oo dhex mara saamileyda siyaasadda iyo sidoo kale afti loo qaado dastuurka. Inkastoo uu baarlamaanku ka doodi doono arrintan, taageerada dhinacyada kale ee siyaasadda, dib-u-eegista dastuurka, iyo afti ayaa lagama maarmaan u noqon doonta go'aannadan oo kale ee wax looga beddelayo nidaamka dowladeed ee hadda jira. Dhab ahaantii, wax-ka-beddelka nidaamka dowladnimo waxaa loo arki karaa dhib aan loo baahneyn iyadoo lagu guda jiro culeyska hannaanka ku heshiinta nooc doorasho.

## ARRINTA SHANAAD: GUDDIGA MAAREYNTA DOORASHADA

GWQ ayaa isku raacay dhismaha 15 xubnood oo cusub oo ah Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka iyo Soohdimaha dalka. Dowladda federaalka ayaa soo magacaabi doonta saddex xubnood halka dowlad-goboleed kasta iyo Maamulka Gobolka Benaadir ay soo magacaabi doonaan min labo xubnood. Xubnaha guddiga waxaa loo asteeyay in lagusoo gudbiyo hal bil gudaheed marka la saxiixo heshiiska, taasoo ah 27 Juun 2023. Guddigan doorashada ayaa mas'uul ka ahaan doona hannaanka doorashada iyo arrimaha amni ee la xiriira.

Heshiiskan cusub ee guddiga doorashooyinku waxa uu ka baxsan yahay qaab-dhismeedkii Guddiga Madaxa-banaan ee Doorashooyinka Qaranka ee hore ee la dhisay 2015. Heshiisku waxa uu ka kordhinayaa tirada xubnaha guddiga 9, oo ay markii hore ahaayeen, kana dhigayaa 15. Waxaa kale oo uu ku casuumayaa dowlad-goboleedyada in midkiiba uu usoo magacaabo 2 xubnood guddiga. Mabda' ahaan, tani waxa ay abuuraysaa hay'ad maareyn doorasho oo la federaaleeyay, taasoo dowladda federaalka iyo dowlad-goboleedyada ay wadaagi doonaan saameynta soo magacaabisteeda. Waxaa kale oo ay meesha ka saari doontaa baahida loo qabo in la helo Hay'ado Maarayn Doorasho oo heer dowlad-goboleed ah, taasoo culeysyo waawayn ku keeni doonta awoodda, isku-duubnida iyo isku-dubbaridka doorashooyinka.

Waxaa jira caqabado kale oo dhowr ah oo la xiriira guddiga cusub ee doorashooyinka ee la isku raacay. Ugu horreyn, heshiiska GWQ waxa uu oggolaanayaa 30 maalmood oo keliya in xubnaha GWQ ay kusoo gudbiyaan xubnaha guddiga doorashooyinka. Taasi waxa ay meesha ka saareysaa fursad kasta oo uu baarlamaanku kaga doodi kari lahaa heshiiska doorashada. Waxaa kale oo ay iska indhatireysaa dadaallada lagu doonayo in heshiiska la waafajiyo sharciyada khuseeya.

Midda labaad, waxaa loo baahan yahay in dib-u-eegis lagu sameeyo shuruucda lagu maamulayo guddiga doorashada, dastuurkuna kamid yahay. Haddi xataa heshiis siyaasadeed laga gaaro qaab-dhismeedka guddiga doorashooyinka, waxaa muhiim ah in dib-u-eegis lagu sameeyo xeerka lagu aasaasay GMDQ, heshiiska lagu dhex xuso, lana ansixiyo sharciga kahor inta aan la magacaabin xubnaha guddiga. Waxaa intaa dheer, dastuurku waxa uu farayaa in GMDQ uu yeesho sagaal xubnood oo keliya – tani waxa ay u baahan tahay in la beddelo, si loo hubiyo in hay'addu si sharci ku dhisan tahay.

Midda saddexaad, waxa ay halis ugu jirtaa sameynta hay'ad la siyaasadeeyey oo aan shaqayneyn taasoo hoggaamiyeyaasha dowladda federaalka iyo dowlad-goboleedyada u magacaabaan siyaasiyiin ay ku kalsoonyihiin, kuwaasoo muhiimadda koobaad siinaya sidii ay u maamuli lahaayeen habraaca halkii ay u horseedi lahaayeen fulinta howlaha farsamo.

Midda afaraad, heshiisku si cad uma qeexayo sida xubnahan loosoo xulayo. Xubnaha GMDQ waxaa ansixiyay baarlamaanka 2015 kadib markii ay soo magacawday xukuumaddi xilligaas; kadibna baarlamaanka ayaa mid mid ugu codeeyay 9-ka xubnood. Tani waxa ay siisay hay'adda sharciyadda in ay u shaqayso si ka madax-bannaan hay'adda fulinta maadaama ay ansixiyeen oo ay u codeeyeen baarlamaanku. Heshiiska cusub ee doorashada ee GWQ ma caddeynayo sida xubnaha cusub ee Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha loo ansixin doono.

Midda shanaad, hay'adda cusub ee lasoo jeediyay ayaa ka shaqeyn doonta doorashooyinka iyo xuduudaha labadaba. Waxaa horey u jiray Guddiga Madaxa-bannaan ee Xuduudaha iyo Federaalka, kaasoo ah dastuuri. Heshiiska GWQ ma uusan sheegin in guddigan la kala diri doono iyo in kale maadaama guddiga doorashooyinku uu sidoo kale ka shaqeyn doono arrimaha xuduudaha.

Ugu dambeyntii, 15-ka xubnood ee guddiga muddo-xileedkoodu maku cadda heshiiska GWQ. Tan oo kale waxaa inta badan lagu qeexaa shuruucda dhismaha hay'adda. GMDQ waxa uu lahaa muddo xil-hayn 6-sano ah oo aan loo cusboonaysiin karin 9-ka xubnood.

## CAQABADO KALE

Heshiiska GWQ waxa uu dhalinayaa walaacyo dhowr ah oo ballaaraan oo u baahan wadahadal siyaasadeed oo qoto-dheer iyo is afgarad kahor inta aan heshiiska la dhaqan-galin.

**Ma cadda xiriirka uu heshiiska la leeyahay dib-u-eegista dastuurka:** Heshiiskii doorashada ee GWQ waxa uu dhaliyay dood ku saabsan dastuurka. Xubnaha GWQ waa hogaamiyayaal fulineed oo aan ku imaan doorasho dimoqraadi ah, sida cadna dastuurka federaalku wax sharciyad ah ma uusan siin. Heshiisku waxa uu ka hor imanayaa qodobo dastuurka federaalka kumeelgaarka ah oo muhiim ah sida hannaanka dowladnimo (nidaam baarlamaani), nidaamka dimuqraadiyadeed ee xisbiyada badan, iyo muddo xileedka madaxwaynaha iyo baarlamaanka. Heshiisku waxa uu sidoo kale iska indhatirayaa dastuurrada dowlad-goboleedyada waxa uuna siinayaa muddo kordhin aan la qeexin madaxwaynayaasha dowlad-goboleedyada. Hannaanka degdegga ah ee uu ku dhashay heshiiska GWQ, gaar ahaan la tashi la'aanta arrin dastuuri ah oo muhiim ah waxa ay dhalisay welwel ku saabsan kalsoonida lagu qabi karo GWQ. Qodobada heshiiska qaarkood ayaa iyaguna u muuqda kuwo aan loo tixgelin muhiimadda ay leedahay in lagu dhex shaqeeyo hab-raacyada dastuurka. Tusaale ahaan, GWQ waxa uu ku baaqay in la fuliyo qodobo kamid ah heshiiska sida magacaabista guddiga maamulaya doorashada muddo 30 maalmood gudahood ah iyadoo la ogyahay in loo baahanyahay in wax laga beddelo sharciyada khuseeya arrintan iyo dastuurka si loogu fuliyo arrintan qaab sharci ah.

Muhiimadu waxa ay tahay in laga shaqeeyo sidii heshiisyada noocan ah ay hadda u mari lahaayeen habraaca rasmiga ah ee dib-u-eegista dastuurka ee uu dastuurku jideeyay (taas oo ay mas'uul ka yihiin Guddiga Madaxa-bannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka iyo Guddiga La Socodka Dastuurka ee Baarlamaanka iyo hababka kale ee sharci-dejinta. Inkastoo tan loo aqoonsan yahay in ay tahay arrin mudnaan leh, hoggaanka baarlamaanku qeyb kama aysan ahayn GWQ, baarlamaankana lagalama tashan hannaanka. Sidaas darteed, marka loo gudbiyo baarlamaanka si ay dib-u-eegis ugu sameeyaan waxaa laga yaabaa in kooxo is abaabulay oo baarlamaanka ka tirsan ay beddelaan qodobo bud-dhig u ah heshiiska GWQ sidii dhacday 2020 markii qaabka doorshada ee metelaadda isku-dheellitiran iyo liiska xeran loo beddelay Horreeyaa Guuleysta. Tani waxa ay keeni kartaa khilaaf cusub oo u dhexeeya goleyaasha fulinta iyo sharci-dejinta.

**Maqnaanshaha Puntland:** Madaxweynaha Puntland Siciid Cabdullaahi Deni ayaan qeyb ka ahayn heshiisyadii GWQ ee dhawaan laga gaaray awood qeybsiga, hannanka garsoorka, federaaleynta maaliyadda, qaab-dhismeedka amniga qaranka, iyo doorashooyinka. Maqnaanshaha Puntland waxa ay wiiqaysaa sharcinimada go'aannada GWQ. Heshiiska doorashada ee GWQ ayaa wakhti u

cayimaya doorashada goleyaasha deegaanka (30 Juun 2024) iyo baarlamaannada dowlad-goboleedyada iyo madaxweynayaasha (30 Nofembar 2024). Balse, marka loo eego jadwalkeeda gaarka ah, waxaa la filayaa in doorashada madaxtinimada Puntland ay dhacdo Janaayo 2024, kuna dhacdo nidaam gabi ahaanba ka duwan kii Muqdisho lagu heshiiyey 27-kii Maajo. Taasi waxa ay la macno tahay in heshiiskaasi uusan ka hirgeli karin Puntland taa beddelkeedana uu keli ku ahaan doono gobolada koonfurta iyo bartamaha.

**La tashi la'aan:** Guud ahaan, heshiiska waxaa lagu dhaliilay wada tashi la'aan, gaar ahaan maadaama uu soo jeediyay fikrado aan aad horay looga doodin, sida nidaamka siyaasadeed ee labada xisbi. Iyagoo ka falcelinaya, kooxaha mucaaradku waxa ay soo saareen waraaqo, waa ayna kasoo horjeesteen heshiiska marka laga reebo mabda'a guud ee ah in loo gudbo doorashooyin qof iyo cod ah. Waxaa laga yaabaa in heshiisku soo dedejiyo in mucaaradku dib isu abaabulaan iyo mucaaradad adag oo ka hor timaadda ajendaha dowladda wakhti hore, taasoo keeni karta in xukuumaddu ka gaabiso wax-ka-qabashada howlaha kale ee mudnaanta leh (marka laga reebo doorashooyinka) cadaadiskan siyaasadeed awgeed. Sidoo kale, kooxo kala duwan oo heer dowlad-goboleed ah oo mucaarad ah ayaa iyana ka muujiyay mucaaradad, mana la sameynin heshiiska kahor la tashi dadwayne oo ballaaran.

**Isku-qasidda arrimo dhowr ah:** Heshiiska GWQ waa uu ka ballaaran yahay heshiis doorasho. Waxa uu taabanayaa xisbiyada siyaasadda, hannaanka dowladnimo, guddiga maamulaya doorashooyinka, iyo doorashooyinka dowlad-goboleedyada. Arrimahan ayaa lagu kala qeexay dastuurada dowladda federaalka iyo dowlad-goboleedyada iyo dhowr sharci. Waxaa wanaagsanaan lahayd in GWQ uu kala saaro doodahan kala duwan balse xiriira oo ay cadeeyaan hannaanka loo raacayo sharciyeynta heshiisyadan.

## TALOOYIN TIXGELIN MUDAN

Heshiiskii GWQ ee doorashooyinka ayaa lagaga doodi doonaa labada gole ee baarlamaanka Soomaaliya. Waxa aan soo jeedineynaa dhowr talo oo tixgalin mudan.

**Xusbiyada Siyaasadda:** Marka hore, waxaa loo baahan yahay in wada-hadallo siyaasadeed oo ballaaran laga yeesho tirada xisbiyada siyaasadda Soomaaliya ay tahay in ay yeelato. Tani waxa ay ahayd arrin muhiim ah marka la fiiriyo Soomaaliland iyo Puntland labadaba. Intaa kadib, baarlamaanku waa in uu dib-u-eegis ku sameeyaa sharciga xisbiyada siyaasadda ee hadda jira (Xeer Lr. 19 ee 27 Juun 2016) islamarkaana wax-ka-beddel ku sameeyaa 12-ka shuruud ee xisbiyada rasmiga ah lagu xiray, kuwaasoo ku xusan qodobka 6-aad ee sharciga, kaasoo dhigaya in toban kun (10,000) codbixiyeyaal diiwaangashan oo ku kala sugan sagaal kamid ah siddeed iyo tobankii gobol ee Soomaaliya ee jiray kahor 1991 ay ka diiwaangashan yihiin xisbiga. Arrimaha ay muhiimka tahay in halkan lagu caddeeyo waxaa kamid ah in la kala saaro xisbiyada siyaasadeed ee heer qaran iyo heer dowlad-goboleed. Xeerka xisbiyada siyaasadeed ee qaran waxa uu xoogga saarayaa doorashooyinka qaranka oo keliya. Waxa uu baarlamaanku mudnaanta siin karaa waddooyinka iyo hababka u sahlaya xisbiyo badan in ay u qalmaan in ay noqdaan xisbiyo siyaasadeed oo buuxa. Wadar dhan 5,000 oo codbixiyeyaal ah oo ka diiwaangashan 3 ama 4 dowlad-goboleed ayaa noqon karta hab macquul ah oo lagu dhimo tirada xisbiyada siyaasadeed ee hadda jira (110) sidoo kalena sahli karta in diiwaangalin rasmi ah loo sameeyo xisbiyada ugu cadcad Soomaaliya. Haddii kale, baarlamaanka ayaa meesha ka saari kara shardiga diiwaangalinta rasmiga ah. Haddii qaabka doorashadu uu yahay Metelaadda Isku-dheellitiran iyo Liiska Xeran iyo Hal Deegaan Doorasho, xisbiyada siyaasadeed ee kumeelgaarka ah waxa ay ka qeyb qaadan karaan doorashooyinka baarlamaanka ee heer qaran. Hasayeeshee, shardi ayaa noqon kara (waxaana lagu caddeyn karaa Sharciga Doorashooyinka Qaranka) in xisbiyada siyaasaddu ay helaan ugu yaraan 7% codadka guud si ay xaq ugu yeeshaan in ay noqdaan xisbiyo rasmi ah oo kuraas ku yeesha baarlamaanka. Xisbiyada siyaasadeed ee ku guul darreysta in ay helaan 7% ama ka badan wadarta codadka guud waa la kala dirayaa.

**Nooca Doorashada:** Hababka Metelaadda Isku-dheellitiran iyo Liiska Xeran iyo Hal Deegaan Doorasho waa uu ka shaqeyn karaa Soomaaliya maadaama uu xallinayo su'aalo muhiim ah sida xaalka meelaha aan xasiloonayn iyo Soomaaliland. Sikastaba ha ahaatee, waxa ay noqon kartaa arrin qiima leh haddi la tixgeliyo faa'idooyinka ay leeyihiin deegaan-doorasho ku saleysan heer dowlad-goboleed, gaar ahaan in Puntland lagu qanciyo in ay kusoo biirto GWQ. Intaa waxaa dheer, arrin ay muhiim tahay in la caddeeyo ayaa waxa ay noqon kartaa sida hannaanka doorashadu u xaqiijinayo ka-qeybgalinta. Hannaan kasta oo doorasho oo u baahan doorasho toos ah waxa ay u badan tahay in uu carqaladeeyo habka

awood qeybsiga 4.5 ee lagu dhaqmayay ilaa 2000. Ka-qeybgalinta, gaar ahaan qabiillada aan saameynta badan ku lahayn siyaasadda iyo haweenka, waa in lagu caddeeyaa habraacyo sida zebra listing. Heshiiska GWQ waxa uu u baahan doonaa baarlamaanka in uu dib-u-eegis ku sameeyo Sharciga Doorashooyinka Qaranka.

**Is-waafajinta Wakhtiyada Doorashada:** Xukuumadda iyo baarlamaanka federaalku waxa ay awood u leeyihiin doorashooyinka federaalka kaliya halka doorashooyinka dowlad-goboleedyada ay hoos imaanayaan maamullada gobollada. Baarlamaanku waa in uu marka hore u kala saaraa doorashooyinka kuwo qaran iyo kuwo dowlad-goboleed. Shuruucda xisbiyada siyaasadeed iyo doorashooyika federaalka ee hadda jira kama hadlayaan doorashooyinka baarlamaannada dowlad-goboleedyada iyo degmooyinka. Doorashada dowlad-goboleedyada waa in loo daayaa in dowlad-goboleedyada, marka laga reebo meelo muhiim ay tahay in la is waafajiyo sida diiwaangelinta codbixiyayaasha iyo horumarinta xisbiyada siyaasadda. Tani waxa ay sidoo kale u oggolaan kartaa dowlad-goboleedyada in ay doorashooyinka tooska ah ee heer dowlad-gobleed u dhisaan habraacyo maan-gal ah ayagoo aqoonsanaya adkaanshaha habraaca. Waxaa kale oo muhiim ah in heshiis kasta oo ku saabsan muddo kordhin uu kasoo dhasho wada-hadallo heer dowlad-goboleed ah oo loo dhan yahay, haddii lagu heshiiyana lagu xusaa dastuurrada dowlad-goboleedyada. Tani waxa ay sidoo kale lagama maarmaan ka noqon kartaa heer federaal. Heshiis kasta oo lagu beddelayo muddo-xileedka baarlamaanka iyo madaxwaynaha waa in uu caadiyan ka bilowdaa dowladda xilka imaan doonta.

**Guddiga Maamulaya Doorashada:** Marka hore, baarlamaanku waxa uu ka codsan karaa madaxda fulinta in ay joojiyaan ku magacaabista xubnaha guddiga muddo 30 maalmood gudahood ah sida ku cad heshiiska doorashada ee GWQ ilaa qaab-dhismeed sharci looga dajinayo guddiga doorashooyinka. Marka labaad, baarlamaanku waa in uu dib-u-eegis ku sameeyaa xeerka dhismaha GMDQ, si ay u tixgeliyaan heshiiskii GWQ, uguna sameeyaan hannaan sharciyeed guddiga doorashada iyo soohdimaha. Waa in uu jiraa wada-hadal dhab ah oo joogto ah oo ku saabsan doorka hay'adda maaraynta doorashooyinka ee heer qaran, marka loo eego hay'adaha heer dowlad-goboleed ee jira sida Guddiga Kumeel-gaadhka ah ee Doorashooyinka Puntland iyo Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka Galmudug si looga fikiro sida ugu habboon ee loo hirgelin karo doorashooyin heerar kala duwan ah iyadoo la adeegsanayo hay'adaha dhisan.

**Nidaamka Siyaasadeed:** In laga guuro nidaamka baarlamaanka loona guuro hab madaxwayne waa go'aan u baahan heshiis sal ballaaran oo wadar-oggol ah. Tani waa in ay ka madax-bannaanaataa doodaha doorashada. Waa arrin dastuuri ah oo aan saamayn toos ah ku lahayn hannaanka doorashada. Soomaaliya ama ha qaadato nidaam madaxtooyo ama hasii lahaato midka baarlamaaniga ah, muhiimaddu waa qabashada doorashooyinka. Guddiga Madaxa-bannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka iyo Guddiga La Socodka ee Baarlamaanka waxa ay qaban karaan doodo baarlamaan iyo kuwo dadwayne oo ku saabsan arrintan waxa ayna ku xusi karaan dastuurka. Wax-ka-beddelka nidaamka dowladeed waxa uu u baahan yahay in saddex meelood labo meel labada gole ee baarlamaanka federaalku ay u codeeyaan iyo sidoo kale afti dadwayne; marka tan lasoo gabagabeeyo, go'aanku waxa uu noqonayaa mid lagu dhaqmo.

## KU SAABSAN SOMALI PUBLIC AGENDA

Somali Public Agenda (SPA) waa hay'ad aan macaash doon ahayn oo ka shaqeysa cilmibaarista arrimaha jaangoynta iyo maareynta siyaasadaha dalka xarunteeduna tahay magaalada Muqdisho. Ujeedka hay'adda waa hagaajinta maamulka dowliga ah iyo horumarinta adeegyada dowladda ee Soomaaliya iyadoo loo marayo cimibaaris iyo falanqeyn aqoon ku dhisan.

Somali Public Agenda waxa ay aaminsan tahay in dhammaan dadka Soomaaliyeed ay mudan yihiin adeegyo bulsho oo wanaagsan oo ay kamid yihiin helitaan waxbarasho la awoodi karo, daryeel caafimaad, guri, amni iyo caddaalad ee uu bixiyo maamul hufan oo lala xisaabtamo.

### Howlaha Aan Qabanno

**Cilmibaaris**: Somali Public Agenda waxa ay ka qeyb qaadataa sare-u-qaadista fahamka iyo hagaajinta maamulka dowliga ah ee Soomaaliya iyadoo loo marayo cilmibaaris iyo falanqeyn lagu sameeyo arrimo kala duwan oo saameeya siyaasadda dowladda iyo bixinta adeegyada bulshada. SPA waxay si joogto ah u daabacdaa daraasado iyo faallooyin (oo intooda badan ku qoran afafka Soomaaliga iyo Ingiriiska) falanqeeya maamul-daadejinta iyo dowladaha hoose; dimuqraadiyeynta iyo doorashooyinka; maamulka maaliyadda; amniga, cadaaladda, iyo ku dhaqanka sharciga; qorsheynta magaalooyinka iyo maamulka dhulka; shaqada; iyo, nidaamka waxbarashada iyo adeegyada caafimaadka. Qoraalladani waxay inta badan macluumaad iyo falanqeyn ka siiyaan muwaadiniinta, siyaasad-dejiyeyaasha, aqoonyahannada iyo beesha caalamka arrimaha dowlad-dhisidda iyo adeegyada bulshada ee Soomaaliya.

**Wadahadal**: Public Agenda Forum waa madal iyo goob lagu falanqeeyo arrimaha dowlad-shisidda iyo adeegyada bulshada ee Soomaaliya. Madashu (oo ay ku jiraan kulamo bille ah oo loo yaqaanno Gaxwo & Gorfeyn) waxaa loogu talagalay in lagu gorfeeyo arrimaha muhiimka ah ee mudnaanta u leh bulshada. Qeybaha kala duwan ee bulshada oo ay ku jiraan cilmibaarayaal, siyaasad-dejiyayaal, iyo xirfadlayaal ayaa lagu martiqaadaa inay si siman u lafaguraan arrimaha laga doodayo. Public Agenda Forum waxay qabanqaabisaa wadahadallo lala yeesho siyaasiyiinta iyo dadweynaha waxayna abaabushaa aqoon-is-weydaarsiyo, siminaaro, iyo bandhigyo buugaag iyo daraasado. Inta badan qodobbada kasoo baxa doodaha Madasha waxay macluumaad ku biiriyaan faallooyinka Somali Public Agenda.

**Naqshadeynta Adeegyada Bulshada**: Iyadoo lagu saleynayo natiijooyinka iyo talooyinka daraasadaheena, waxaan innagoo kaashaneyna hay'adaha ay khuseyso naqshadeynaa siyaasadaha, barnaamijyada, iyo mashaariicda innagoo adeegsaneyna SPA Policy Lab. Innaga oo kaashaneyna siyaasad-dejiyeyaasha, shaqaalaha rayidka, iyo bulshada, waxaan u naqshadeynaa adeegyada dadweynaha si aqoon ku dhisan. Kahor inta aanay dowladdu maalgelin siyaasadaha, barnaamijyada, iyo mashaariicda la qorsheeyay, waxaan ka caawinnaa in lagu tijaabiyo adeegga la naqshadeeyay heer yar si loo fahmo waxtarka adeegyada la naqshadeeyay.

**Tababar**: Iyadoo lagu saleynayo natiijooyinka cilmibaaristeena iyo naqshadeynta aan sameyno, Xarunta Waxbarashada iyo Horumarinta ee Somali Public Agenda waxay bixisaa koorsooyin tababar gaaban si gacan looga geysto dhisidda kaadir maamul oo fulin kara siyaasadaha iyo barnaamijyada. Xarunta Waxbarashada iyo Horumarinta ujeeddadeedu waa in lagu xiro shaqaalaha rayidka ah, siyaasiyiinta, iyo shaqaalaha hay'adaha aan macaash doonka ahayn bulshada iyo in la siiyo maamullada xirfadaha farsamo ee lagama maarmaanka u ah diyaarinta iyo hirgelinta xalalka caqabadaha adeegga dadweynaha ka jira. Intaa waxaa dheer, xaruntu waxay siisaa tababaro xirfadlayaal Soomaali ah gaar ahaan kuwa xiiseynaya inay ku biiraan dowladda iyo sidoo kale xirfadlayaasha ku howlan adeegyada bulshada iyo hay'adaha aan macaash doonka ahayn.

**Somali Public Agenda**
Moqdisho
Soomaaliya
Tel: +252(0)85 8358
Email: info@somalipublicagenda.org
Website: <https://www.somalipublicagenda.org>